

Markuu xanaaqu iga bato oo aan ku sigto inaan dilaaco...



Warbixin iyo wacyigelin ku socota waaliinta iyo dadka kale ee waawayn



Wadankan Noorway waa ka mabnuuc in caruurta la garaaco. Maxaa marka la sameeyaa, markaan rajo dhigno, caroono, oo aanaan arkin xal kale? Ma ka badbaadi karnaa inaan ku dhacno xaalad wareegta oo xanuun badan?

Mar marka qaarkood waxa aan waalid ahaan la kulanaa wax ka baxsan dulqaadkeena, sida

- Marka uu ilmaheena yari diido inuu seexo oo aan waalid ahaana daalno oo aan qarka u saaranahay inaan quusano.
- Marka uu ilmaheena 3 jirka ah wax walba diido oo wax maqli waayo
- Marka uu ilmaheena 9 jirka ah keeno wadhadal aan dhamaan oo dulqaadka naga dhameeya
- Marka ilmaheena dhalinyarada ahi ay guriga u soo hoydaan xili ka duwan kii lagu balamay.
- Marka ilmuhu / ama dhalinyaradu u dhaqmaan si ka duwan sida aan waalid ahaan u aragno sida saxda ah ee ay tahay inay tarbiyadoodu noqoto.

Waalid badan ayaa dareema miciin la`aan markay xaaladahaan oo kale la soo gudboonaadaan, oo waxay si kadis ah ugu ficil tamaan si wareer leh, xanaaq leh, iyo iyagoo rajo dhiga. Mar marka qaarkood waxaa dhacda inaan waalid ahaan u daalno sababo aan ilmaha shuqul ku lahayn aawadood, oo uu dulqaadkeeno dhamaad joogo. Anaga- ama inta nagu hareersanba- waxaan dareenaa inaan ku dhow nahay inaan qaraxno oo u adkeysan wayno waxyaabo yar yar oo aan marka xaalado kale lagu jiro u aragno wax aan wax ka soo qaad lahayn.

Mar marka qaarkood waxaa dhacda inaan ilmaha ula dhaqano si aan wanaagsanayn oo ay ka mid yihiin: Maagid, gil giliid, jugayn, iyo dharbaaxid. Marka qofku rajo dhigo ma arko siyaabo kale oo uu ku ficil celin karo. Waxaana badanaa natiijadu noqotaa inuu qofku ka qoomameeyo ficilkii ka dhacay oo ay sii korodho rajo dhigidiisii.

Arintani ma tahay mid aad iska dhex garanayso? Haday haa tahay , keli kuma tihid middan. Waalidiin badan ayaa dareema miciin la`aan markay xaaladahaan oo kale ay ku yimaadaan.

Dalbo in lagu caawiyo hadii aad dareemayso inuu koontaroolku kaaga dhumayo si aan adiga iyo ilmahaagaba u wanaagsanayn. Waxaad arintan kala hadli kartaa kalkaalisada caafimaadka ama qof kale oo aad ku kalsoonaan karto si ay kaaga caawiyaan sidaad ku heli lahayd siyaabo kale oo aad ku xalin karto xaaladaha adag ee kula soo gudboonaada. Arintan xiriir kala soo samee intaanay dhibaatooyinku sii kordhin. Waxaa haboon in laga hor tago dhibaatooyinka intaanay sii kordhin.

Waxaad caawimo ka heli kartaa meelahan:

- Laamaha caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka ee dugsiyada
- Xanaanada caruurta
- Adeega daryeelka caruurta
- Talo siiyaha dugsiyada
- Adeega waxbarida iyo cilmi nafsiga
- Taleefoonka loogu talo galay inay soo wacaan dadka waa wayn iyo caruurta walwalsan oo u furan dadweynaha maalmaha shaqada inta u dhaxaysa 09:00 ilaa 15:00, taleefankiisuna yahay : 810 03 940 ama cinwaanka boostada ee barta inter-nett-ka ee bekymring@vfb.no

Hadii xaaladahani yimaadaan ama dhacaan habaynka horaantiisa ama saqda dhexe oo aad fursad u halayn inaad la xiriirto meelaha kor ku xusan waxaad wici kartaa:

- Taleefoonka SOS- ama Kaniisada SOS oo lambarkeedu yahay: 815 33 300.
- Taleefoonka caawinada ee loogu talo galay caafimaadka maskaxda oo lambarkiisu yahay: 810 30 030 ama barta inter-nett-ka ee: www.sidetmedord.no

Labadan adeeg waxay furan yihiin oo la heli karaa maalin iyo habeenba.



Barnaamijka wacyigalinta waalidka waa fursad ay ka faa`iidaysan karaan waalidiinta leh caruurta da`doodu u dhaxayso 0 ilaa 18 sano. Hadafka barnaamijka waa in adiga waalidka ah (aabe iyo hooyoba) aad ku kalsoonaato inaad samayso wixii caruurtaada u wanaagsan. Barnaamijka wuxuu ku dareen siin doonaa waxyaabaha wanaagsan ee aad caruurtaada u qabato. Hadii aad u baahantahay, waxa kale oo lagaa caawin karaa in aad hesho siyaabo ama xeelado kale oo badeli kara sidaad ilamahaaga ula macaamisho. Barnaamijka wacyigalintu, waalidiinta wuxuu fursad kuu siinayaa inaad hesho kooxo waalidiin kale oo aad iswaydaarsataan xirfadaha waalidnimo iyo caawin ku aadan sidii aad u heli lahayd xal ku anfaca.

Degmooyin badan oo waawayn ayaa ku bixiya fursadan wacyigalinta waalidiinta luuqado kale oo ka duwan afka noorwijiga.

Caawimo ku siinaysa xirfad

www.bufetat.no/foreldreveiledning/